




Vehicle for Hire



WARBIXINTA # 003

DIB-U-CUSBOONAYSIINTA SHATIGA TAARGADA EE LIMOUSINE

AGOOSTO 2025

Muddada dib-u-cusboonaysiinta ee Shatiga Taargada Limousine (L.P.L.) ee 2025 waa gudaha bisha Sibteembar.

Inta aan ku jirno muddadan mashquulka badan, wakhtiyada sugitaanka ee xafiiska Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire) wuxuu ka badan karaa wakhtigii caadiga ahay waxaana kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga iyo garowshiyahaaga. Hadda waxaan wadnaa habka dib u cusboonaysiinta onlaynka ah, laakiin hadda, dib u cusboonaysiinta waa in lagu dhammeeyaa si fool-ka-fool ah iyadoo la imanayo xafiiska Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire).

Xafiiska Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire office) (2340 – 22 Street NE) wuxuu furan yahay inta u dhaxaysa saacadaha 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo, Isniin ilaa jimco, si dib loogu cusboonaysiyo shatiga. Fadlan oggsoonow, xafiiska waa la xiri doonaa Isniinta, Sibteembar 1^{deeda}, iyo Talaadada oo ah Sibteembar 30^{keeda}, oo ah fasaxyada sharciga ah.

Dadka taargooyinka haysta waxaa la xasuu sinayaa in ay la yimaadaan Shatiga darawalnimada ama Shatiga Darawalnimada Taksiga ee Gobolka Alberta oo ansax ah. Kharashka dib-u-cusboonaysiinta shatiga taargada ee limousine (L.P.L.) waa \$415.

Waxaan rajeyneynaa inaan ku aragno bisha Sibteembar. Fadlan wixii su'aalo ah noogu soo dir iimaylk VFHlicensing@calgary.ca

Fariiintan waxaa loo turjumay Af-amxaari, Af-Carabi, Af-faransiis, Af-hindi, Af-bunjaabi, Af-soomaali iyo Af-urduu. Guji [halkan](#) si aad u aragto dokumentiyada.

Si ku dheehan daacadnimo,

Cory Porter

Ku Xigeenka Madaxa, Gawaarida u Diyaarsan in La kireeyo (Vehicle for Hire)
Maaraynta Xaaladaha Deg-dega ah iyo Amniga Bulshadda